

## Ku socota waaliddiinta iyo macallimiinta

Waxaad heleysaa warqaddan maxaa yeelay waxaad la shaqeysaa ama aad u tahay waalid mid ka mid ah dhallinyaradeenna Stockholm. Annaga soo qoreyna ee weydiisaneyna caawimaadda waxaannu ka shaqeynaa guryaha Dugsiga ee Stockholm AB (SISAB). Annaga ayaa leh oo gacanna ku hayna dhismooyinka dugsiyada iyo dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta carruurta ee magaalada.

Waxaannu u baahaannahay caawimaaddaada si loo yareeyo waxyeellada. Dhibaato joogto ah oo soo noqnoqota. Waannu ognahay in la saameyn karo sida ay wax u socdaan haddii aannu dhammaanteen is kaashanno. Hab' waa in dhallinyarada la fahamsiiyo oo ay gartaan in uu isagu yahay dugsigooda, maaha oo keliya macallimiinta, maamulaha ama SISAB waxooda. Haddii ardaydu ay fahmaan in ay tahay dugsiga meesha qeyb weyn oo noloshooda ka mid ah ay ku dhismeyso laga billaabo saaxiibbada nolosha iyo jeceylka ugu horreeya ilaa iyo sida la rejeynayo rabitaanka waxbarashada markaas taasi waxaa ay keeni kartaa waxyeellada oo yaraata.

Waa dugsigoodi, meel ay tahay in ay ku ahaadaan ammaan, ayna ku dareemaan in wax lagu faano ilaa heer ay tahay in laga tirsanaado.

In la yiraahdo meel ka fududdahay in la sameeyo?

Shaki kuma jiro taas, laakiin waxaannu u aragnaa in ay soconeyso haddii annaga dhammaanteen aannu waqti gelinno, sabarna yeelanno.

## Maxaad sameyn kartaa?

La hadal dhallinyarada! Guriga, dugsiga iyo dad kale oo waaweyn.

- Maxaa ay yihiin waxa dugsi ka dhigaya wax ay ardaydu leeyihiin?
- Maxaa ay yihiin sababaha ka dambeeya waxyeellada?
- Waa maxaay sababta ay koox yari uga ciyaareyso nolosha dad aad u fara badan?
- Maxaa ay noqoneysaa natiijadu?

Waxyeelleyntu waxaa ay qiime ahaan ku kaceysaa dhawr milyan oo koron sannad walba. Laakiin wax walba waxaa ugu xun haddii ay cid ku dhaawacanto.

Annaga haddaanu nahay SISAB taageero ayaanu fadlan bixineyana, la hadal waardiyaha si aad u heshid nambarka taleefanka milkiilaha guriga ama maamulaha SISAB.

## Is gacan qabta midba midka kale!

Bogaadin naga timid annagoo ah SISAB

